

Ma ka walwalsan tahay isbeddelada ku imaanaya Kaalmada kaarkaaga Caafimaadka? Hel xaqiiqada jirta.

Laga billaabo Oktoobar 2026, Sharciga Dib-u-heshiisiinta Federaalka (HR.1) ee uu Madaxweyne Trump saxiixay 2025 wuxuu la yimid shuruudo cusub oo loogu talagalay Medicaid, oo ah barnaamij caymis caafimaad oo federaal ah oo loogu magac daray kaarka Kaalmada Caafimaadka ee Minnesota.

Wixii macluumaad ah ee ugu dambeeyay ee ku saabsan waxa aad u baahan tahay inaad ogaato si aad ugu diyaar garowdo isbeddeladan, iskaan garee koodhka QR ama booqo mn.gov/dhs/federalchanges. Keydso boggaas oo gal mar badan.



Weli waxba isma beddelin. Isbeddellada ugu horreeya waxay dhacayaan dayrta 2026, badanka isbeddelladuna waxay dhacayaan billowga 2027. Uma baahnid inaad sameyso wax sidii hore ka duwan hadda si aad u sii haysatid kaarka caawimaada caafimaadka.

Waa maxay isbeddelladan, qofkee ayay saameynayaan iyo goorma?

Maxay	Qolama	Goorma
Shuruudaha shaqada	Dadka da'doodu u dhaxayso 21 ilaa 64 sano oo aan lahayn carruur ku tiirsan, uurna aan lahayn isla markaana aan helin Caawinaad Caafimaad oo ku saleysan naafonnimo	Jan. 1, 2027
Dib-u-cusboonaysiinta u-qalmitaanka kaarka caafimaad taasoo soo noqnoqota	Dadka da'doodu u dhaxayso 21 ilaa 64 sano oo aan lahayn carruur ku tiirsan, ahna kuwo aan uur laheyn oo aan helin Kaalmo Caafimaad oo ku saleysan naafonimo waxay u baahan doonaan inay cusbooneysiyaan caymiska lixdii biloodba mar halkii ay ka cusboonaysiin lahaayeen 12-kii biloodba mar.	Jan. 1, 2027
Waqtiyo gaaban oo uu caymis dib u daboolayo kharashaad caafimaad ee hore	Dadka codsanaya Gargaarka Caafimaadka Janaayo 1, 2027 ama ka dib	Jan. 1, 2027
Kharashka la isla wadaagayo bixinta adeegyada qaarkood	Dadka qaar oo da'doodu u dhaxayso 21 ilaa 64 sano oo aan lahayn carruur ku tiirsan, uurna aan lahayn isla markaana aan helin Caawinaad Caafimaad oo ku saleysan naafonnimo	Oktoobar 1, 2028
Isbeddelka u-qalmitaanka kaarka ee qaar ka mid ah dadka	Kaliya qaar ka mid ah dadka haysta sharciga degganaanshaha joogtada ah, soo galootiga Cuba iyo Hayti, iyo muhaajiriinta COFA (dad ka yimid jasiirado leh heshiis gaar ah) ayaa u qalmi kara Kaalmada Caafimaadka. Dadka aan u	Oktoobar 1, 2026

soo galootiga ah	qalmi doonin waxaa ka mid ah dadka waaweyn ee da'doodu ka weyn tahay 21 sano oo ah qaxooti, dadka loo oggolaaday inay dalka soo galaan sababo bini'aadantinimo, dadka la siiyay magangelyo, qaar ka mid ah lamaanayaasha iyo carruurta la dhibaateeyay, kuwa dhibbanayaasha u ah ka ganacsiga dadka, iyo kuwa kale ee loo oggolaaday inay joogaan sababo bini'aadantinimo darteed.	
------------------	--	--

Qofkee ayaysan saamayn doonin arrimahaan?

Dadka ka diiwaangashan Kaalmada Caafimaadka badankooda isbeddeladan ma saameyn doonaan haddii ay:

- Helaan caymis ku salaysan naafannimo
- Da'du tahay 65 jir ama ka weyn
- Da'du tahay 20 jir ama ka yar
- Ay tahay qof uur leh

Maxaan kale oo samayn karaa?

- Booqo mn.gov/dhs/mycontactinfo si aad u barato sida loo cusbooneysiyo macluumaadkaaga xiriirka si aan kuula soo xiriirno.
- Booqo mnrenewallookup.com si aad u aragto goorta ay cusboonaysiintaadu billaabnayso.
- La soco boostadaada oo ay kuugu imaanayso warqad leh goobo buluug ah markii la gaaro waqtiga caymiska la cusbooneysiin lahaa iyo inaad durba soo buuxisid codsiga cusboonaysiintaada. Wax badan ka baro mn.gov/dhs/renewmycoverage.

Si aad wax badan uga ogaato muhiimada caymiska Medicaid ama na la wadaagtid sheekadaada:

- Booqo mn.gov/dhs/medicaid-matters si aad u hesho macluumaad ku saabsan doorka muhiimka ah ee uu caymiska Medicaid ka ciyaaro caafimaadka iyo fayyo-qabka qof ka mid ah shantii qof ee reer Minnesota ah.
- Fiiri bogga Wajiyada Dadka Haysta Medicaid ee "Faces of Medicaid" si aad u akhrisid sheekooyinka ay reer Minnesota na la wadaageen ee ku saabsan sababta ay Medicaid iyaga muhiim ugu tahay, iyo si aad adigana u soo gudbisid sheekadaada.

Nagu xirnow!



facebook.com/MinnesotaDHS



x.com/minnesotadhs



youtube.com/user/MinnesotaDHS



public.govdelivery.com/accounts/MNDHS/subscriber/new